

Macluumaadka Healthy Kids ee Ku Saabsan Kiimikooyinka Organophosphorus Flame Retardants



Kiimikooyinka lagu daro badeecooyinka iyo agabyada si aysan si fudud dab u qabsan waa walxo lagu daro noocyo badan oo badeecooyin ah si ay u adkaato inay dab u qabsadaan. Kiimikooyinka lagu daro badeecooyinka iyo agabyada si aysan si fudud dab u qabsan (Organophosphorus flame retardants, OPFRs) waa nooc ka mid ah kiimikooyinka dab-celinta. Sabab ah isticmaalkooda oo baahsan, OPFRs waxaa si caadi ah looga helaa bey'addaha gudaha guryaha iyo kuwa dibaddaba.

Saynisyahannadu weli waxay baranayaan sida kiimikooyinkan dab-celinta ahi u saameeyaan caafimaadka dadka. Qaar ka mid ah waxay faragelin karaan hormoonnada dabiiciga ah ee jidhka, taas oo saamayn karta koritaanka dhallaanka iyo carruurta. Qaar kalena waxay waxyeello u geysan karaan habdhiska neerfaha, habdhiska taranka, ama waxay keeni karaan kansar.

Ka helitaanka OPFRs gudaha kaadida carruurta waa arrin caadi ah mana aha mic-naheedu in caafimaadkooda uu waxyeello gaadhi doono. Saynisyahannadu weli way baranayaan heerarka laga yaabo inay khatar yihiin.

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah iyo agab, fadlan soo booqo boggeena:



Healthy Kids MN


health.mn.gov/HealthyKidsChemicals

Halkee Laga Heli Karaa OPFRs?

1

Si loo yareeyo dabka qabsashada, **OPFRs** waxaa lagu daraa badeecooyinka sida:

Buush-xumbeedka loo adeegsado ka dahaar ahaanta dhismaha



Agabyada gudaha gawaarida



Kuraasta gawaarida

Agabyada carruurta ay ku ciraayeen ee laga sameeyay jooradiyada jilicsan ee yaryar (sida baloogyada iyo gogosha lagu ciyaaro)

Alaabyada guryaha iyo maryaha lagu xardho

Jooradiyada

Elegtaronigiyada

Gogosha

2

OPFRs waxay si tartiib-tartiib ah uga soo daadan karaan alaabta waxayna dhex geli karaan hawada oo ayna booreyn karaa gudaha guryaha iyo gaadiidka.

3

Carruurta waxeey ugu beylah noqon karaan iyagoo:


- Gudo-neefsanayo hawada iyo boorka
- Laqaya boorka marka ay gacmahooda gelinayaan ama alaabooyinka afkooda
- Taabasho toos ah la lahaanayo badeecooyinka
- Ku gurguuranaya ama ku ciyaaraya sagxada guriga, taasoo kordhisa taabashada boorka

Sida Aad Hoos ugu Dhigi Karto U Beylah-noqoshada OPFRs

Si joogto ah u nadiifi sagxadaha iyo oogooyinka gurigaaga si aad uga ilaaliso inuusan boorku isugu uruurin guriga.



Ka yagleel in cunuggaagu dhaqo gacmaha ka hor inta uusan wax cunin.




Bedel alaabta guriga ee jooradigoodu jeexmaday ama midka uu cudbigiisu banaanka u soo baxay.



Alaabta guriga waxaa laga yaabaa inay lahaato summad muujinaysa haddii jooradiga laga sameeyay lagu daray kiimikooyinka aan sida fudud dabka u qabsaneynin (laakiin ma muujineysa noocyada kiimikada). Badeecooyinka kale, waxaad la xiriiri kartaa shirkadda si aad u weydiiso ku darista kiimikooyinka sida fudud aan dabka u qabsaneynin.

Tixgeli bedelida alaabta carruurta ee qadiimka ah ee laga sameeyay jooradiyada jilicsan ee yaryar.



Tan iyo 2019, sharciga Minnesota wuxuu xaddiday qaddarka qaar ka mid ah OPFRs ee lagu dari karo alaabooyinka carruurta, furaashyada, iyo alaabta guriga ee jooradiyada yaryar lagu xardho/sameeyo. Alaabihii hore (ka hor xaddidaaddan) waxaa ku jiri kara heerar sare oo OPFRs ah.

OPFRs Laga Baaray Kaadida Ilmahaaga

OPFRs waxay isu beddelaan kiimikooyin la xiriira marka ay jidhka ku jiraan. Waxaan ugu yeernaa kuwan “walxaha ka dhasha” Healthy Kids Minnesota waxay cabbir ku samaysay walxaha ka dhasha OPFRs ee kujira kaadida ilmahaaga. Kiimikooyinka aan sida fudud dabka qabsan iyo walxahooda ka dhasha waxay leeyihiin magacyo kiimiko oo dhaadheer, sidaa darteed waxaan isticmaalnaa magacyo soo gaabinno oo caadi ah taasoo aan ku qorno xaanshida natiijooyinka ilmahaaga.



Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan magacyada kiimikada oo dhameystiran, fadlan booqo: health.mn.gov/HealthyKidsResults

www.health.mn.gov
Si aad macluumaadkan ugu hesho qaab kale, email u soo dir: health.biomonitoring@state.mn.us

Waaxda Caafimaadka ee Minnesota
Minnesota Department of Health
Biomonitoring Program
625 Robert St N, PO BOX 64975
St. Paul, MN 55155-2538



Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah iyo agab, fadlan soo booqo boggeena: health.mn.gov/healthykidsmn